

## **XEER-SHARCI Lamb. 1 ee 17 Febaraayo 1968**

### **WAX KA BEDDELID XEERKA HABKA CIQAABTA**

#### **MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

KADIB markii la arkay qod. 63 ee Dastuurka;  
KADIB makii laga baaran degey baahida loo qabo in wax laga beddelo shuruc ka tirsan; Xeerka Habka Ciqaabta oo lagu ansixiyey Dekreeta sharci no. 1 ee 1 Juune 1963;  
IYADOO la tixgeliyey soo jeedinta Wasiirka Cadaladda iyo Arrimaha Diinta;  
IYADOO la tixgeliyey soo jeedinta Golaha Wasiiradaha.

#### **WAXAA LA AMRAY:**

Xeerka Habka Ciqaabta oo lagu ansixiyey Dekreetada Sharci lamb. 1 ee 1da June 1963 waxaa wax loogaga beddelay sida soo socota:

##### **Qod. 1**

Inta hoos ku tixan waxay beddeli doonta qodobka 5 (2) (a) ee Xeerka Habka Ciqaabta ee luqada Ingiriiska:

- a) ‘lama carifi karo awooda sida ku qoran faqradda horeysay’.

##### **Qod. 2**

Waxaa hadallada halkaan ku qoran ay beddeli doonaan qod. 12 (2) (b) ee Xeerka Habka Ciqaabta:

b) ‘Qeybta Assise hortiisa iyo Qeybta Caadiga ah ee Maxkamadda Rafcaanka iyo Maxkamadda Gobolka Xeer-Ilaaliyaha Guud ama Ku-xigeenkiisa, ama Sarkaal ka tirsan qeybta Booliska ee Gobolka ama ciddi kale oo isagu u xilsaaro ee aan darajadiisu ka hooseynin Sarkaal ku xigeen.

##### **Qod. 3**

1. Hadalladaani waxaa lagu kordhiyey qod. 23 (2) ee Xeerka Habka Ciqaabta ee ku qoran luqada Talyaaniga iyo midka aftka Ingiriiska ah:

b) Sarkaal Boolis waxaa loola jeeda, Madaxa Saldhigga Booliska iyo Saraakiisha iyo Saraakil xiggennada ee kawa tirsan Ciidanka ama ciidama kale iyo Hey’addo oo ku tilmaaman faqradda 1 ee isla qodobkaani, Inta kale waxay kawaka mid yihiin askarta Booliska iyo saraakiisa guud sida uu qoraayo qod. 240 ee Xeerka Ciqaabta.

2. Tilmaamtaani sare ku xusay waxay hirgeli doonta taarikhdu uu Xeerka Habka Ciqaabto uu hirgalo.

##### **Qod. 4**

Halkaan inta ku qoran waxay beddeli doonta qod. 38 ee Xeerka Habka Ciqaabta:

##### *Qod. 38*

*Xarriga qof la soo eedayey*

*Sarkaalka Booliska wuxuu xiri kara qof isagoo haysanin ruqsada xarriga haddii:*

1. *Ay xaalad ded-deg ah ay jirto madaama ay dhici karto in:*
  - a) *Shaqsigu in la xiro ay tahay uu galay fal dembiyeed oo sharcigu u dhigay ciqaab xarrig oo ka badan 10 sano ama ciqaab taas ka culus;*
  - b) *In ay adkaato helitaanka ruqsada xarriga taas oo sababi karto in eedeysanuhu uu ka cararo goobta oo la waayo haddii aanan isla waqtigaasi la xirin.*
2. *Sida uu qabot faqradda 2 ee qod. 50.*

#### **Qod. 5**

Hadallada soo socda waxay beddeli doonaan qod. 91 (b) ee qeybta ku qoran afka Talyaaniga ee Xeerka Habka Ciqaabta:

« b) Ka qeyb galka Xeer Ilaaliyaha Guud ee maxkamadda.»

#### **Qod. 6**

Qoraalka soo socda waxay beddelaan faqradda 1aad ee qod. 11 ee Xeerka:

1. Isagoo u baahan aqbalidda Maxkamadda, Xeer Ilaalihu wuxuu ka noqon kara eedeeynta oo dhan ama qeyb ka mid ah, waqti kasto ee maxkamaddu socoto intii aanan go'aan maxkamadeed laga gaarin. Haddii ciqaabta ugu horeeysa ee u dhigan fal dembiyeedka lagu soo eedeeyey ay ka sareeyso 3 sano, waxaa laga doonaya in si qoraal ah uu Xeer Ilaaliyahu uga codsadaa dib ula noqoshada eedeeyntaasi.

#### **Qod. 7**

Qoraalkaan waxa lagu beddeli doonaa qod. 188 (2) ee Xeerka ku qoran afka Talyaaniga:

2. Baarista ugu horeeysay iyo su'aalaha waxaa saldhig u noqon doono falalka ugu muhimadda leh, laakin weydiinta su'aalaha ma ku koobnaan doonan oo keliya falalka uu eedeysanahu qoraalkiisa marqaatiga ugu horreyey uu ku tilmaamay.

#### **Qod. 8**

Haddii uu isqilaaf luuqadeed uu dhexmaro micneeynta Xeerka ku qoran afka Ingiriiska iyo midka afka Talyaaniga ku qoran, waxaa la qaadan doona qeybta afka Ingiriiska ku qoran.

#### **Qod. 9**

Dekreeto- sharcigaani wuxuu hirgali doona maalinta ku xigta maalintii lagu daabacay Faafinta Rasmiga ah waxaan la horgeeyn doona Golaha Qaranka si Sharci loogaga dhigo iyadoo la raaci doono qod. 63 ee Dastuurka

Muqdisho, 17 Febraayo 1968.

**Abdirashid Ali Shermarke**

Ra'isul Wasaaraha  
**Mohamed Haji Ibrahim Egal**

Wasiirka Caddaladda iyo Arrimaha Diinta  
**Aden Shire Jama**